Somaliska

Faktablad för arbetssökande –
Stöd och matchning – mer stöd i jobbsökandet

2014-12

# Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta – taageerada dheeraad ee shaqo raadsashada

Taageero iyo isku habboonaansiinta [Stöd och matchning] waa adeeg loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo u baahan, taageerada dheeraad ee shaqo raadsashada, taasoo ah mid firfircoon oo adiga gaar ahaan loogu talagalay loona qabsiiyay. Adeegga waxaa laga hela shirkado gaar ahaan loo leeyahay oo laakinse heshiis Xarunta Shaqada la galay, waxaana ka heleysaa caawinaad adag oo aad shaqo ku hesho. Taageerada waxay noqon kartaa aalad aad shaqo raadsashada iyo caawinaad aad xiriir kula yeelan karto loo shaqeeyeha. Adiga ayaa xulan kara shirkadda laga helo adeegga noocaas ah. Ujeedada adeegga Taageerada iyo isku habboonaansiinta ayaa waxay tahay in adiga aad sida ugu dhaqsida badan shaqo u hesho ama waxbarasho ku bilaawdo.

## Waa arrin xaaladaada iyo baahidaada ku xiran

Gacanhaayeha arrimaha shaqada adiga ku gaarka ah ayaa qiimayn doono haddii Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta lagu siin karo, iyo heerka taageerada lagu siin karo. Adeegga wuxuu ka kooban yahay afar heer:

### Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta aasaasiga ah

Caawinaad lagu wanaajiyo shaqo raadsashada, isku habboonaansiinta shaqada iyo xiriiryada loo shaqeeyeha iyo shabaakada.

**Hakadka 1:** Ugu yaraan 30 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo dhaqdhaqaaq afar saacadood toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 2:** Ugu yaraan 30 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo dhaqdhaqaaq sagaal saacado toddobaadkii. (3 bilood)

### Aasaaska Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta la socoto taageerada luqada

Isla nooca taageero ee aasaaska Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta, laakinse waxaa lagugu siinayaa afkaaga hooyo, luqad kale aad garanayso ama qof turjubaan ayaa ka caawini doono.

**Hakadka 1:** Ugu yaraan 45 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo afar saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 2:** Ugu yaraan 45 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo sagaal saacado dheeraad dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

## Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta la xoojiyay

Iyadoo wakhti dheeraad la siiyo shirkadda beddelka heerka aasaaska.

**Hakadka 1:** Ugu yaraan 30 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo sideed saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 2:** Ugu yaraan 30 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo laba iyo tobban saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 3:** Ugu yaraan 30 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo 20 saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. Ku jirta tababar. (3 bilood)

## Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta la xoojiyay wehlisa taageerada luqada

Iyadoo wakhti dheeraad la siiyo shirkadda. Taasoo lagugu siin doono afkaaga hooyo, luqad kale aad garanayso ama qof turjubaan ayaa ka caawini doono.

**Hakadka 1:** Ugu yaraan 45 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo sideed saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 2:** Ugu yaraan 45 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo laba iyo tobban saacado dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. (3 bilood)

**Hakadka 3:** Ugu yaraan 45 daqiiqado oo ah wadahadal-shaqsiyeed iyo 20 saacado dheeraad dhaqdhaqaaqa toddobaadkii. Tababar ku jirta. (3 bilood)

Adeegga wuxuu ka koobnaan doonaa waxa adiga iyo shirkadda adeegga isla garataan inaad u baahan tahay inaad samayso, ama aad barato sidii aad shaqo ku heli lahayd awgeed. Saddex bilood ayaa Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta ka qaybgeli doontaa, kaddib waxaan ku dhaqaaqi doonaa xaalad qiimayn. Waxaan ku biri karnaa adeegga saddex bilood kaddib, xaaladaha qaarkood saddex bilood kale oo dheeraad ah. Ugu badnaantii sagaal bilood ayaa Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta ka qaybgeli kartaa.

### Adeegyadaan ayaa adeegga ka heli kartaa

Waa arrin xaaladaada iyo baahidaada ku xiran waxa u adeegga ka koobnaan doono. Dhowr tusaaleed: Taageerada shaqada lagu raadsado

laguna helo, caawinaad foomamka codsiga lagu buuxiyo, xiriir la yeelanshada loo shaqeeyeyaasha, wadahadal dhiirigeli ah, waxbarashada kombyuutarka, hogaaminta waxbarashada iyo xirfadaha, booqasgada aqoon korarsashada, dhaqdhaqaaq goob shaqo lagu qaban doono, waxbarashada luqada iwm.

## Adiga ayaa shirkadda adeegga xulan karo

Adiga ayaa xulan kara shirkadda adeegga. shabakadda internetka arbetsformedlingen.se, halka ay ku taallo *Stöd och service*, waxaad ka heleysaa warbixinta shirkadaha adeeggyada iyo tilmaan-bixin sida loo codsado. Tusaale ahaan eeg hab-shaqaynta shirkadda adeegga, luqada, aqoonta ay laanta ganacsiga u leeyihiin ama wax kale oo ay khabiir ku yihiin markii aad xulashada ku dhaqaaqayso. Waxaa xitaa xulan kartaa shirkadda adeegga degmadaada ka hawlgasho. Kaddib gacanhaayeha arrimaha shaqada ku gaarka ah wargeli shirkadda adeegga aad xulatay.

## Wadada loo maro waa sidatan

1. Gacanhaayeha arrimaha shaqada ayaa go'aanka helida adeegga Qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta iska leh, isla isaga ayaa qiimeeyo heerka taageerada adiga kugu habboon.
2. Kaddib adiga ayaa dooranaayo shirkadda adeegga oona wargelinaayo gacanhaayeha arrimaha shaqada.
3. Kaddib Shirkadda adeeggaa ayaa kulanka ugu horeeyo dartiisa kula soo xiriiri doonto. Waa wadahadal hordhac ah oo aad ku wada qorsheyn doontaan sida ugu dhaqsida badan ee aad shaqo ku heli lahayd.
4. Xilliga aad qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta ka qaybgelayso waxaa sii wadi doontaa qorshehi aad Xarunta Shaqada la lahayd, sida shaqo raadsasho iyo inaad soo gudbiso wargelinta dhaqdhaqaaqa.
5. Saddex bilood kaddib wuxuu gacanhaayeha arrimaha shaqada ku gaarka ku dhaqaaqi doonaa xaalad qiimayn, kaddib go'aan ka gaari doonaa haddii aad u baahan tahay saddex bilood oo qorsheha Taageero iyo isku habboonaansiinta oo dheeraad ah.

## Fursadda laysaga beddelo shirkadda adeegga

Haddii aadan ku qanacsanayn taageerada ay shirkadda adeegga ku siiso waxaad xaq ku leedahay inaad iska beddesho. Arrintaas kala xiriir gacanhaayeha arrimaha shaqada adiga ku gaarka ah. Haseyeeshe, waa inaad shirkadda wargelisaa 14 maalmood kahor. Mudadaas isla

shirkadaas ayaa taageerada ku siin doonto. Shirkadda adeegga cusub waxaad ka sii wadi doontaa halka tii hore aad ku joojisay. Macneheedu waxay tahay laguma siin doono saddex bilood oo cusub.

Ha iloowin inaad noola soo xiriirto haddii ay jiraan wax caabasho ah oo xiriir la leh shirkadda adeegga.

Warbixin dheeraad awgeed waxaad nalaga soo xiriiri kartaa khadka taleefanka 0771-416 416, ama booqo xafiiska Xarunta Shaqada kugu dhow ama arbetsformedlingen.se.